

Doorashada qofka u qalma abaalmarinta darjada ugu sarreysa gobolka Alberta ayaa socota

Janaayo 16, 2025 [Media inquiries](#)

Dadka deggan gobolka Albertan waxaa lagu dhiirigelinayaa inay doortaan xubnaha bulshada ugu xusida mudan, hoggamiyayaasha iyo hal-abuurayaasha si ay ugu xubin noqdaan Darajada Abaalmarinta gobolka Alberta

Abaalmarinta waa darajada ugu sarreysa gobolka oo waxayna maamuustaa muwaadiniinta wax la taaban karo oo waara ku soo kordhiyay bulshadooda. Xubnaha waxaa ka mid ah ciyaartooyda Olombikada, saynisyahannada, mutadawiciinta, hoggaamiyayaasha ganacsiga, iyo fanaaniinta. 220 dad ah oo ku nool gobolka Albert ayaa xubin ka noqday Darajada Abaalmarinta gobolka Alberta tan iyo markii la aasaasay 1979.

Doorashooyinka waxaa la aqbalaa sanadka oo dhan, laakiin waa in la soo gudbiyaa Febraayo 15 si loo tixgeliyo ka qaybqadashada abaalmarinta sanadkan.

Musharixiinta waa inay ahaadaan muwaadiniin Kanada ah oo hadda ku nool Alberta, haddii la doorto, waa inay awoodaan inay ka soo qaybgalaan xafladda abaalmarinta. Dadku ma dooran karaan naftooda, xaaskooda/ninkooda ama xubin ka tirsan qoyskooda xigaalka ah.

Macluumaad ku saabsan Abaalmarinta, sida tilmaamaha doorashada, foomamka doorashada iyo xogta dadka horey ugu soo guulaystay waxaa laga heli karaa webysaydka [Alberta Order of Excellence](#) .

Su'aalaha warbaahinta

[Gary G. Mar](#)

587-897-3311

Gadoomiyaha, Guddiga Darajada Abaalmarinta gobolka Alberta

[Gayle Stannard](#)

Agaasimaha Fulinta, Darajada Abaalmarinta gobolka Alberta